# Early Childhood Connector | Gu’ga 2024

*Warsidahaaga saddex biloodlaha ee ku saabsan daryeelka carruurta iyo waxbarashada hore.*

## Waxaa ku jira warsidahan

Early Childhood Connector | Gu’ga 2024 .......... 1

**Kusoo dhawoow Early Childhood Connector .......... 2**

**Wicitaanada Early Childhood Connector .......... 2**

**Kheyraadka cusub si aad ula xiriirto macluumaadka shatiga .......... 3**

**Barkadaha Dabaasha, goobaha ciyaarta biyaha iyo alaabta lagu ciyaaro kale ee biyaha .......... 4**

**Wacyigelinta CMV waxay ka bilaabataa halkan .......... 4**

**Kheyraadka Qoysaska, Carruurta iyo Adeegbixiyeyaasha .......... 5**

**Ma qabtaa su'aalo? .......... 5**

**Ma haysaa jawaab celin? .......... 5**

## Kusoo dhawoow Early Childhood Connector

Waad ku mahadsan tahay isdiiwaangelinta Warsidaha Early Childhood Connector! Golaha Wasiirada Carruurta ee Minnesota iyo Waaxaha Waxbarashada, Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ayaa abuuray warsidahan si ay u habeeyaan isgaarsiinta bixiyeyaasha xanaanada cunugga iyo barayaasha hore ee Minnesota. Bixiyeyaasha xanaanada ilmaha iyo barayaasha hore waxay filan karaan warsidaha rubuc biloodlaha ah iyo xoogaa cusub oo iimaylo ah. Fadlan buuxi ra'yi-ururinta ku xidhan xagga hoose warsidahan si aad noogu sheegtid sidaad u aragto waxa ku jira iyo sida aan u wanaajin karno isgaarsiinteena.

## Wicitaanada Early Childhood Connector

Saddexdii biloodba mar, gobolka ayaa adeegbixiyayaasha daryeelka carruurta iyo macallimiinta hore la martigelinaya Connector Calls si ay uga jawaabaan su'aalaha la xiriira sharciga, ruqsadda, barnaamijyada, deeqaha iyo in ka badan. Ujeedada wicitaanku waa in laga jawaabo caddeynta su'aalaha laga yaabo in adeegbixiyeyaasha ay qabaan. Wicitaanada waxaa lagu martigeliyaa khadka tooska gudaha WebEx, waa lagu duubaa diyaarna ku tahay bogga websaydhka Early Childhood Connector.

Dhammaan macallimiinta noocyada kala duwan waxaa lagu casuumay wicitaanadaas. Waxaan soo dhaweyneynaa su'aalaha ka imanaya barnaamijyada shatiga leh, xarumaha shahaadada leh, barnaamijyada ka reeban, adeegbixiyeyaasha sharciga ah ee aan shatiga lahayn, Qoyska, Saaxiibka iyo daryeelayaasha deriska, iyo shakhsiyaadka xiiseynaya bilowga ganacsiga daryeelka carruurta.

**Nagala soo qaybgal Wicitaanka Early Childhood Connector**

- **Taariikhda wicitaanka xiga:** Talaado, Luulyo 16, 2024, 7-8 galabnimo
- **Halkee:** Lagu martigelinaya khadka tooska ah gudaha WebEx
- **Xiriiriyaha Kulanka:** https://minnesota.webex.com/minnesota/j.php?MTID=m1a73d1de890a96661896f516c52e1e29
- **Ujeedada:** Si gobolka uga jawaabo su'aalaha cadeynta ee adeegbixiyeyaasha daryeelka carruurta iyo macallimiinta hore. Gobolku wax kama qaban doono cabashooyinka shakhsi ahaaneed inta lagu jiro waqtigan.
- Fadlan **halkan ku soo gudbi su 'aalahaaga.** Su'aalaha waa in la soo gudbiyaa ka hor dhacdada; kama jawaabi doonno su'aalaha tooska ah. Waxaan ku dedaalaynaa inaanu sida ugu fiican uga jawaabno dhammaan su'aalaha sida waqtigu noo oggolaado. Fadlan soo gudbi su'aalahaaga laba toddobaad ka hor wicitaanka.

Fadlan jadwalkaaga ku keydso taariikhda iyo xiriiriyaha kulanka; gobolku ma soo diri doono casuumaada kulanka. Wicitaanka waxaa la duubi doonaa oo si ku meel gaar ah ay u heli doonaan dadka aan imaan karin.

Wax badan ka baro Wicitaanada Early Childhood Connector, oo ay ku jiraan taariikhaha soo socda, oo halkan ku soo gudbi su 'aalahaaga. Waxaan rajeyneynaa inaan ku aragno wicitaanada soo socda!

## Kheyraadka cusub ee lagu taageerayo shaqaale weynaha carruurnimada hore

Shaqaale weynaha Early Childhood ee Minnesota: Samaynta Isbeddel Sannadaha Hore waa dukumiinti loogu talagalay in lagu taageero dhanka daryeelka hore iyo waxbarashada. Waxaa ka mid ah waddooyinka xirfadeed, fursadaha horumarinta xirfadeed, barnaamijyada shahaadada, ilaha maalgelinta, sheekooyinka iyo xigashooyinka xirfadlayaasha, iyo in ka badan. Mashruucan waxaa loo sameeyay iyada oo loo marayo Deeqda Minnesota’s Preschool Development Grant, iyadoo lala kaashanayo Departments of Education, Human Services, Health and the Children’s Cabinet.

Waxaa sidoo kale la sameeyay afar muuqaal oo u dhigma. Guji xiriiriyeyaasha soo socda si aad u maqasho xirfadlayaasha carruurnimada hore ee kala jooga guud ahaan Minnesota iyagoo wadaagaya waxa ku dhiirrigelinaya inay la shaqeeyaan carruurta yaryar iyo qoysaska, sababta ay u maleynayaan in shaqaaluhu muhiim u yihiin, sababta ay u jecel yihiin shaqooyinkooda, iyo in ka badan. Qoraalada muuqaalka la socda ee Ingiriisiga iyo Isbaanishka ayaa lagu heli karaa dhammaan muuqaalada.

- Sheekooyinka Ka Imanaya Aagaas: Adeegbixiye Qabiileed iyo La Taliyaha Caafimaadka Maanka ee Early Childhood
- Sheekooyinka Ka Imanaya Aagaas: Macalinka Waxbarashada Gaarka Ah Ee Carruurnimada Hore Iyo Macalinka Bilowga Madaxa Hore (Early Head Start Teacher)
- Sheekooyinka Ka Imanaya Aagaas: Adeegbixiye Qoyka Daryeelka Carruurta
- Sheekooyinka Ka Imanaya Aagaas: Macalinka Daryeelka Carruurta Ee Xarunta Ku Salaysan Iyo Tababaraha Parent Aware

Intaa waxaa dheer, turjumaada nooc ka mida Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Khibarada Xirfadlayaasha Carruurnimada Hore ee Minnesota iyo Tilmaamaha Lamaane ee u dhigma ayaa **hadda lagu heli karaa Hmong, Isbaanish, Soomaali iyo Fiyatnaamiis.** Qaab-dhismeedka Aqoonta iyo Khibrada wuxuu sharxayaa waxa xirfadlayaasha carruurnimada hore ee la shaqeeya carruurta yaryar ay tahay inay ogaadaan oo ay awoodaan inay sameeyaan. Noocyada waxaa heli kara kuwa la shaqeeya dhallaanka iyo ilmaha, adeegbixiyeyaasha daryeelka carruurta qoyska, iyo carruurta da 'da dugsiga hore ee barnaamijyada xarumaha iyo dugsiga. Booqo Bogga websaydhka Qaab-dhismeedka Aqoonta iyo Khibradaoo hoos u soco bogga si aad u hesho xiriiriyayaasha soo dejinta.

## Kheyraadka cusub si aad ula xiriirto macluumaadka shatiga

Way adkaan kartaa in la dhex maro oo la fahmo kala duwanaanshaha barnaamijyada daryeelka carruurta ee shatiga leh. Xeerarka khuseeya xarumaha shatiga leh laguma dabaqi karo barnaamijyada daryeelka carruurta ee qoyska, way adkaan kartaa in la fahmo farqiga u dhexeeya xarumaha shahaadada leh iyo xarumaha shatiga leh.

Dedaal lagu caawinayo adeegbixiyeyaasha inay helaan macluumaadka saxda ah ee ku saabsan barnaamijkooda, Waaxda Shatigu waxay abuurtay ilo cusub oo loogu talagalay barnaamijyada shahaadada leh iyo xarumaha shatiga leh iyo barnaamijyada daryeelka carruurta qoyska. Shaxda cusub wuxuu bixiyaa websaydhyada internetka, macluumaadka xiriirka, liisaska iimeylka iyo in ka badan oo lagu kala saaray nooca shatiga barnaamijka.

Adeegbixiyeyaashu waxay door muhiim ah ka ciyaaraan qaabeynta khibradaha iyo badqabka carruurta ee Minnesota oo dhan. Gobolku waxay aqoonsan tahay caqabadaha iyo mas'uuliyadaha adeegbixiyeyaasha ay waajahaan maalin kasta, oo ay ku jiraan dhex marka noocyada kala duwan ee shatiyada iyo macluumaadka. Waxaan rajeyneynaa in shaxda ay gacan ka geysaneyso ku xirida adeegbixiyeyaasha ilaha saxda ah.

## Barkadaha Dabaasha, goobaha ciyaarta biyaha iyo alaabta lagu ciyaaro kale ee biyaha

Xilliga gu'ga ayaa soo ifbaxay, xagaaga ayaa halkan kasoo dhow. Shati bixiyaayaasha daryeelka carruurta ayaa badanaa hela su 'aasha: Ma isticmaali karaa barkada lagu bood boodo, goobaha ciyaarta biyaha ama alaab ciyareed biyo oo kale oo qayb ka ah barnaamijkayga daryeelka carruurta waxaanan u baahanahay inaan lahaado waalid/mas'uul saxiixa warqada oggolaanshaha ee loo qoondeeyay barkadaha lagu bood boodo?

MN Statutes, section 144.1222 wuxuu barkada lagu boodboodo ku qeexaya sida barkad guri gaar ah, ma aha sida ujeeddooyin xeerarka barkad dabaasha dadweynaha, ilaa iyo inta barkada lagu boodboodo ee la qaadi karo uu leeyahay qotada ugu badnaan 24 inji oo gacanta lagu faaruqin karo oo la dhaqaajin karo. Waxaa jira badeecooyin badan oo cusub oo suuqa ku jira oo laga yaabo in aan si gaar ah loogu yeerin "barkada lagu boodboodo" laakiin waxay la kulmi doonaan qeexitaanka barkada lagu boodboodo maadaama ay hayaan ilaa 24 inji oo biyo ah oo gacanta lagu faaruqin karo. Tan waxaa ka mid ah barkadaha biyaha lagu ciyaaro oo leh sal ururinaya biyo taagan. Xaaladahan, waxaan fileynaa in waalidiinta la siiyo ogeysiiska MDH oo ay saxeexaan warqada oggolaanshaha sida looga baahan yahay MN Statutes, qaybta 245A.14 subd. 10. Ogaanshaha in badeecadu ay weligeed is beddeleyso, haddii aad qabtid su 'aal ku saabsan haddii badeecadaadu ku habboonaan lahayd qeexitaanka kor ku xusan, fadlan la xiriir shati bixiyahaaga.

Haddii adeegbixiyuhu doorto inuu biyaha u isticmaalo siyaabo kale sida baaldi biyo ah oo loogu talagalay dhaqista baabuurta ama miis biyo, alaabooyinkan caadi ahaan ma hoos iman doonaan qeexitaanka barkada lagu boodboodo. In kasta oo ay hayaan biyo yar, ma aha badeecooyin u oggolaanaya in ilmo dhex fadhiisto ama ku dabaasho. Adeegbixiyeyaasha waxaa la filayaa inay isticmaalaan kormeer ku habboon marka la isticmaalayo agab ama alaab u baahan kormeerka dadka waaweyn.

## Wacyigelinta CMV waxay ka bilaabataa halkan

Cytomegalovirus (CMV) waa fayras caan ah. Dadka ka shaqeeya daryeelka carruurta waxay halis u yihiin inay qaadaan caabuqa CMV maadaama fayraska uu si gaar ah ugu badan yahay dhallaanka iyo carruurta yaryar ee dhigta daryeelka carruurta.

Qof kasta oo da' kasta ah wuxuu qaadi karaa CMV oo caadi ahaan astaamo kuma keento dadka caafimaadka qaba, laakiin waxay khatar ku tahay dadka uurka leh ee si aan ogeyn CMV ugu gudbin kara uurku jirtooda koreysa. Marka ilmuhu ku dhasho CMV, caabuqa waxaa lagu magacaabaa CMV lagu dhashay. Mid ka mid ah 5-tii dhallaan ee ku dhashay CMV-du wuxuu ku dhalan doonaa ama ku kori doonaa halis caafimaadk ama naafanimo nolosha oo dhan. Sannadkii 2023, Minnesota waxay noqotay gobolka ugu horreeya ee baara dhammaan dhallaanka ku dhashay CMV iyada oo qayb ka ah barnaamijka baaritaanka dhallaanka cusub.

Samantha, oo ah adeegbixiyaha daryeelka carruurta ee Minnesota oo haysata shati lehna in ka badan afar sano oo waayo-aragnimo ah, waligeed ma maqlin CMV lagu dhasho ilaa baaritaanka cusub looga helay.

“Runtii waxaan aaminsanahay in adeegbixiyeyaasha [daryeelka carruurta] ay tahay inay ogaadaan dhibaatooyinka ka dhalan kara fayraskan iyo sida ay u daran tahay – ma aha oo kaliya hadda laakiin sannadaha soo socda! Ilmuhu ma muujin karo wax calaamado ah marka uu dhasho, laakiin waxay soo saari karaan [calaamadaha] ka dib in laga eegana iyaga goor hore waxay u oggolaan doontaa faragelinta hore," Samantha ayaa sheegtay.

CMV waxaa loo gudbiyaa qof ilaa qof iyadoo si toos ah loogu kala qaadayo dareeraha jirka, sida kaadida iyo candhuufta. Carruurtu waxay u gudbin karaan fayraska dadka kale, oo ay ku jiraan waalidiinta iyo daryeelayaasha, xitaa haddii aysan u muuqan inay jiran yihiin. Carruurta ku dhasha CMV waa in aan laga saarin ka qaybgalka daryeelka carruurta. Adeegbixiyeyaashu waa inay qaadaan tallaabooyin si ay uga caawiyaan ka hortagga faafitaanka fayraska iyagoo gacmaha dhaqaya marar badan, gaar ahaan ka dib markii ay tirtiraan sanka ama afka ilmaha iyo beddelidda xafaayada iyo jeermiska si habboon jeermiska uga dilaan alaabta lagu ciyaaro iyo meelaha kale ee laga yaabo inay yeeshaan kaadida ama candhuufta ilmaha. Adeegbixiyeyaashu waa inay sidoo kale taageeraan qoysaska carruurta ku dhasha CMV.

Akhri warqadda xaqiiqda ee Waaxda Caafimaadka Minnesota Department of HealthCMV and Congenital CMV fact sheet for child care providers si aad wax badan uga barato.

## Kheyraadka Qoysaska, Carruurta iyo Adeegbixiyeyaasha

- Kheyraadka Dheeraadka ah ee Qoysaska, Bixiyeyaashaiyo bulshooyinka
- Iga Caawi Xiriirinta
- Office of the Ombuds for Family Child Care Providers

## Ma qabtaa su'aalo?

Iimeyl u dir ccs.communications.DHS@state.mn.us wixii suaalo ah.

## Ma haysaa jawaab celin?

Nala soo socodsii fikradahaaga ku saabsan warsidahan adigoo qaadanaya sahan gaaban. Jawaabahaagu waxay ka caawin doonaan gobolka inuu hagaajiyo isgaarsiinta uu la leeyahay adeegbixiyeyaasha daryeelka carruurta iyo macallimiinta hore.